

Su'aalaha la Weydiiyo

Fadlan tixraac Xaashida Macluumaadka Kaqeybgalaha imarka ugu horeysa ee muuqaalka guud ee sahanka iyo sida natiijooyinka loo adeegsan doono. Boggan waxaa ku jira macluumaad dheeri ah oo ku saabsan su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee la xiriira sahanka.

Maxaad u samaynaysaa sahankan?

Waxaan dooneynaa inaan ogaanno sida cudurka faafa ee Covid-19 iyo xirxirayaashu u saameynayaan dadka laga tirada badan yahay ee ku nool England, Scotland iyo Wales. Sahankan waxaa sidoo kale si gooni ah loo weeydiinayaa dadweynaha guud si aan u fahmno aragtida kooxaha kala duwan ee dadka.

Ayaa sameynaya sahankan?

Caddaynta Sahaminta Qaranka ee Tayada ah waxaa fulinaya Ipsos MORI, oo ah hay'ad madaxbannaan oo sahamisa, iyada oo ka wakiil ah Xarunta Dhaqdhaqaaqa Isirka ee Jaamacadda Manchester.

CoDE waa barnaamij afar sano ah oo cilmi-baaris ah oo ku saabsan fahamka isbeddelka sinnaan la'aanta jinsiyadaha iyo aqoonsiyada. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo:

<https://www.cmi.manchester.ac.uk/research/projects/code/>

Sideen uga qayb qaataa?

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka qayb qaatid baadhitaanka, waxaad heli kartaa baadhitaanka diiwaangelinta halkan:

<https://surveys.ipsosinteractive.com/surveys/?p=jZt9VfdUz0lpKjKSVU19dx7XQuIvdp%2bHMIFDym5I0Kg3UL40L4YcPmzT3ZhgS2XRRcsH3f9aYbvF9XZJqv9RXf%2f2dIVd2Xvs3qZdmM5qxS4%3d&id=partxtest>

Miyay tahay inaan ka qayb qaato khadka tooska ah?

Maya, waxaad sidoo kale ka qayb qaadan kartaa taleefanka adoo wacaya 0808 1296800 oo aad dhaafto fariin aad ku codsaneyso in dib laguugu soo celiyo (eeg 'Xiriirka' qaybta boggan caawimaad).

Waa imisa wicitaanada khadka caawinta?

Nambarada khadka caawimaaddu dhammaantood waa lacag la'aan.

Miyay tahay inaan ka jawaabo su'aalaha oo dhan?

Kajawaabida su'aalaha waa ikhtiyaari, markaa qasab ma'aha. Waxaan rajeyneynaa inaad kaqeyb qaadan doonto, maadaama tani ay na siin doonto sawirka ugu fiican. Ikhtiyaar "doorbid inaad ka jawaabin" ayaa kuu diyaar ah inaad ku xusho dhammaan su'aalaha tirakoobka dadka haddii ay taasi tahay doorbidayso.

Sahaminta ma ku dhammaystiri karaa luqad kale?

Waxaad sidoo kale ku dhameystiri kartaa ra'yi ururinta 13 luqadood oo kala duwan adiga oo dooranaya midka aad doorbideyso bilowga baaritaanka (fadlan la soco in baaritaanada luqadaha kala duwan laga yaabo in aan isla markiiba la heli karin). Sahaminta telefoonka sidoo kale waxaa lagu dhammaystiri karaa luqad kale. Xulashada luqadaha waxaa ka mid ah Carabi, Bengali, Shiinees,

Gujarati, Bolish, Burtuqiis, Bunjabi: Gurmukhi, Bunjabi: Shahmukhi, Romaani, Soomaali, Turki, Urdu iyo Welsh.

Sideen ku dalban karaa foojarka hadiyaddeyda?

Waxaa si otomaatig ah laguugu soo diri doonaa foojarka hadiyadda markii aad dhammaystirto sahanka oo dhan. Haddii aanad ku helin foojarkaaga 2 toddobaad gudahood ee dhammaystirka sahanka, fadlan la xiriir epanel-uk@i-say.com xiganaya 20-089809-01 - EVENS survey voucher’.

Sidee loo isticmaali doonaa xogta aan ku bixiyo sahanka?

Fadlan tixraac Xaashida Macluumaadka Kaqeybgaleha (oo laga heli karo boggan caawinta) wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan sida loo isticmaali doono xogta iyo nidaamka ilaalinta xogta.

Miyaan qaadan karaa nasasho qayb ahaan intaan ku dhammaystirayo sahanka qadka tooska ah?

Haa, markaad sahankan ku dhammaystiraysid khadka tooska ah, horumarkaagu si otomaatig ah ayuu u keydinayaa. Waad xidhi kartaa daaqada daalacashada ee ay ku jirto sahanku markasta oo aad jeceshahay - horumarkaaga ayaa la keydin doonaa. Markaad diyaar u tahay inaad sii wadato buuxinta ra'yi ururinta, si fudud ugu laabo bogga sahanka adoo gujinaya xiriiriyaha lagu soo diray.

Maxay tahay sababta la iiga codsaday inaan bixiyo boostkoodkayga iyo taariikhda dhalashadeyda?

Xogtaan waxaa loo soo ururiyey si loo hubiyo in cilmi baaristu ay metelayso aragtiyo dad kala duwan ah, tusaale ahaan dadka da'ahaan kala duwan iyo dadka ku nool aagag juquraafiyeed oo kala duwan. Ma aha inaad ka jawaabto su'aashan haddii aadan rabin.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan su'aalaha badanaa la isweydiyo ee la xiriira ujeeddada baaritaanka iyo isticmaalka xogta, fadlan tixraac Xaashida Macluumaadka Ka-qaybgalaha. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan asturnaanta xogta waxaa sidoo kale laga heli karaa Ogeysiiska Arimaha gaarka ah Jaamacadda ee Manchester iyo Ipsos MORI Privacy Policy. Wixii weydiimo dheeraad ah oo aan looga jawaabin bogga macluumaadka Ipsos MORI fadlan emayl u dir: evenssurvey@ipsos-mori.com